

Warar muhiim ah oo ku saabsan saxnimada daabacaaddan

Fadlan xusuuso:

Isbedelo muhiim ah oo lagu sameeyey daabacaaddan markii ugu dambeysay oo wax laga bedelay ka dib ayaa hoos ku qoran. Haddii aad dooneyso sida qeybo gaar ah ee daabacaaddan aay u saameysay, waa in aad dib u eegtaa tii la sameeyey Juun 2012 taasoo halkan looga heli karo Ingiriis iyo Faransiis oo kaliya: (insert new site).

- Talaabada koowaad ee kiisaska maxkamadda qoyska badankood waa in labada qof ee xaaska ah aay tagaan fadhi Barnaamij War oo Khasab ah (Mandatory Information Program (MIP)). MIP-ga, waxaad ogaan doontaa sida dadka waaweyn iyo caruurta aay ula qabsadaan kala tagga, hababka kala duwan ee lagu xalin karo xurgufaha iyo arrimaha sharciga ee ka soo baxa kala tagga iyo furitaanka.
- Hadda waxaa maxkamadaha qoyska ee Ontario oo dhan laga helayaa adeegyo dhexdhexaadin iyo warar. Wixii ah liiska adeegyada iyo dhexdhexaadinta qoyska, booqo: http://www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca/english/family/service_provider_by_family_court_location.asp.
- Haddii aad ku howlan tahay habka maxkamadda qoyska aadna tahay dhibane rabshad qoyseed waxaad la kulmi kartaa Shaqaale Taageero ee Maxkamadda Qoyska si aad kaalmo u hesho. Wixii ah liiska adeeg bixiyayaasha, booqo: http://www.attorneygeneral.jus.gov.on.ca/english/family/family_justice_services.asp#fcs
- Laga soo bilaabo January 1, 2012, xeerar cusub oo ah sida kala tagidda ka dib lacagaha howlgabka Ontario ee aay leeyihiin xaasaska loo qiimeyn iyo qeybin doono. Xaasaska waa in aay weydiistaan maamulaha qorshaha howlgabka qiimeynta qeybta xubinta howlgabka ee qorshaha howlgabka. Qiimeyntaan ayaa ka dib lagu dari doonaa liiska hantida xaaska/ninka xubinta howlgabka ah.